




Sidda loogu wareejiyo dacwo qaadidaada laanta socdaalka (immigration) maxkamad kale (Bedelid Goobta)



Warqadan xogta arursan ahi waxa ay ka hadashaa sidda loogu wareejiyo qaadidaada dacwadda laanta socdaalka maxkamad kale. Tan waxaa kaloo loogu yeeraa “bedelida goobta.” KAAMA ay caawinayso tani u soo sheegida bedelida ciwaanka maxkamadda. Waa **khasab** inaad taa sameyso haddii aad guurto. Barta LawHelpMN waxa ku jira xog aruursan si ay kaaga caawiso soo sheegida ciwaan bedelida.

Gal barta:

LawHelpMN.org/so



Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: LawHelpMN.org/so



Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay’adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaan gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

Go'aansiga Bedelida Goobta

Waa maxay goobtu?

Goobtu waa maxkmadda aad u tagayso qaadidaada dacwadaadda laanta socdaalka (Immigration). Haddii aad leedahay dacwo qaadir laguu qabtay balanteeda kolkaa waxa aad leedahay goob dacwo.

Siddee ayaan ku ogaan karaa goobta (maxkamadda) lagu qabanayo dacwo qaadidayda?

Ogaysiiska dacwo qaadidaddu waxa ku jiri kara waqtii, taariikh, iyo meesha dacwadaada lagu qaadayo. Waa inaad ka xaqijiso akhbaartaadda dacwo qaadida telefan iyo khadka (online) ka.



Telefan ahaan. Wac khadka EOIR ee ah **1-800-898-7180**. Geli Lambarkaaga -A (A-Number) ama “Lambarka diiwaangelinta Ajnabiga.” (Gal barta immigrationhelp.org si aad u hesho Lambarkaaga-A.) Isticmaal taxaalka kala doorashadda waxyaabaha si aad u hubiso taariikhda iyo waqtiga dacwo qaadidaadda. Khadku waa Ingriiska iyo Isbaanish. Riix 2 si lagugu caawiyoo Afka- Isbaanishka.



Khadka (Online). Booqo acis.eoir.justice.gov. Geli A-Lambarkaaga-A. Eeg “akhbaarta Dacwo Qaadida Xigta” iyo “Akhbaarta La Soo Xiriirida Maxkamadda.”

Eeg akhbaarta cid walba oo qoyskaaga ka mid ah oo leh Lambarka-A (A-Number). Marmarka dacwo qaadida waxaa loo qabtaa maalmo kala duwan kiisaska kala duwan xataa haddii dacwo qaadida ay quseeyso dad isku qoys ah.

Waa maxay sababta aan u bedeli goobta dacwo qaadida?

Kaliya waxa aad bedeli kartaa goobta dacwo qaadidaadda haddii aad guurto.



Tusaale ahaan: Pedro waxa uu u guuray gobol cusub.

Pedro waxa uu ku noolaan jiray gobolka Massachusetts. Maxkamadiisa laanta socdaalka waxaa qabtay maxkamad ku taal gobolka Massachusetts. Pedro waxa uu u guuray Minnesota si uu ula noolaado walaashii. Waxa uu rabaa inuu u soo wareejiyo dacwadiisa maxkamad ku taal Minnesota.

Ma u baahnahay inaan ka qaygalo dacwo qaadidayada haddii aan u guuro gobol kale?



Haa! Haddii aad gafto dacwo dhagaysi sababtu wax kastaba ha noqotee, **xaakimka waxaa dhici karta inuu amro in lagu masaafuriyo**. Ka dibna kolkaa waxaad khatar u tahay in lagu masaafuriyo markii la rabo. Xataa hadii aad guurto, waa **khasab** inaad dhamaan ka qaybgasho dacwo dhagaysigagaga laguu qabto oo dhan. Waa khasab inaad tagto maxkamadda xataa haddii aysan ku ool gobolka aad ku nooshahay. Qaar ka mid ah maxkamadahu waxa ay ogolaadaan inaad uga qaybgasho dacwo qaadidaada telefan ama fiidyow adigoo galaya barta: justice.gov/eoir/find-immigration-court-and-access-internet-based-hearings.

Ma inaan bedelaa maxkamayda haddii aan guuro?

May. Waa aad dooran kartaa inaad bedesho maxkamadaadda, laakiin khasab kuguma aha. Waxaad kale oo aad dooran kartaa inaad sii hoos joogto maxkamadaadii hore.



Tusaale ahaan: Pedro ma doonayo inuu bedelo maxkamadiisa.

Pedro waxa uu u guuray Minnesota si uu ula noolaado walaashii. Laakiin waxa uu rabaa in dacwadiisa lagu qaado maxkamadda gobolka Massachusetts. Pedro tan waa uu sameyn karaa, laakiin waa khasab inuu uga qaybgalo dacwo qaadidiisa Massachusetts.

Siddee ayaan u go'aansadaa inaan bedelo maxkamada iyo in kale?

Haddii aad u guurto gobol cusub, waa aad bedeli kartaa maxkamadaadda si kolkaa dacwadaada loogu qaado maxkamad u dhow meesha aad ku nooshahay. Laakiin waxaa jira labo sababood oo **aadan** u dooni karin inaad bedesho goobta maxkamadaadda.

1. **Waxa aad uga qaybgeli kartaa dhagaysiga dacwada khadka.** Qaar ka mid ah maxkamadahu waxa ay ogolaadaan inaad uga qaybgasho dacwo qaadida fiidyow kumbuyuutar ku jira, telefan, ama loox . Haddii maxkamadaada hadda ay kuu ogoshahay inaad uga qaybgasho dacwadda fiidyow kolkaa waa aad sii hoos joogi kartaa isla maxkamadaa. Mana aha inaad u safarto maxkamada dacwadaada qaadaysa. Waxa aad dooran kartaa inaadan bedelin maxkamadaada si ay wax walbaa u sahlanaadaan. Haddii aad doonayo inaad uga qaybgasho dacwadaadda fiidyow, wac maxkamadaadda ka dibna waydii in xaakimku uu u baahan yahay inaad u soo dirto wax warqado oo gaar ah.

2. **Xaakimka loo dhiibay kiiskaaga waxaa uu leeyahay taariikh.** Waa aad eegi kartaa inta goor ee uu xaakim walba ee laanta socdaalku (immigration) ee gobol walbaa uu ansixiyo kiisaska magangelyada ah. (Gal barta: trac.syr.edu/immigration/reports/judgereports/). Haddii uu xaakimkaagu uu inta badan ansaxiyo codsiyada magangelyadda ah, waxaa kuu roon inaad la joogto xaakimkaa. Haddii aad go'aansato in kiiskaagu uu sii joogto maxkamadii hore, hubi inaad dacwo qaadida uga qaybgasho fiidow. Haddii **kale**, waxaad u baahan tahay inaad u safarto dacwo qaadidaadda si aad u uu kiiskaaga u sii hoos joogo maxkamadaa.

Maxaa dhici haddii xaakimku uu diido codsigayga ah inaad bedelo goobta maxkamadayda?

Waa khasab inaad uga qaybgasho dacwo qaadidaada maxkamadii hore ee ku qoran ogaysiiska dacwo qaadidaada. Waa khasab inaad ka qaybgasho dacwada xataa haddii aysan ku ool gobolka aad ku nooshahay. Qaar ka mid ah maxkamadahu wawa ay ogolaadaan inaad uga qaybgasho dacwo qaadida telefan ama fiidow kumbuyuutar ku jira. Waydii maxkamadda inaad uga qaybgasho dacwo dhagaysiga telefan ama fiidow. Haddii aadan ka qaybgelin dacwo qaadida, xaakimka laanta socdaalka (immigration) waxaa dhici karta inuu bixiyo wawa la yiraa amarka *maqnaashaha* oo ah amar maxkamadeed oo wadanka lagaaga saarayo (*adigoo xadair ahayn*). Taa macnaheedu waa waxaa lagu masaafurin karaa markii la rabo.

Haddii aan codsado inaan bedelo goobta maxkamadayda, taasi isla markiiba ma ka cusboonaysiisaa ciwaankayga maxkamadda?


Maya. Waxay u ekaan kartaa wax lagu jaah-wareero waayo waa inaad u dirto maxkamadda cadeyn ah ciwaankaaga cusub kolka aad ka codsato in la bedelo goobta maxkamadaadda.

Laakiin tani ma ay bedesho ciwaankaaga maxkamaddu kaa hayso. Si aad uga bedesho ciwaankaaga maxkamadda, waa khasab inaad buuxiso foom gaar ah (form EOIR-33). Waa ra'yi fiican inaad ka cusboonaysiiso ciwaankaaga maxkamadda isla kolka aad codsanayso bedelida goobta maxkamadda. Barta LawHelpMN waxa ay leedahay warqad xog aruursan haya si ay kaaga caawiso inaad soo sheegto isbedel ciwaan. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/reporting-change-address-immigration-court

Nidaamka Bedelida Goobta Maxkamada

Siddee ayaan u dalban karaa in la bedelo goobta maxkamada?

Waxaa jira 5 tallaabo oo lagu bedelo goobta maxkamadaadda.



Buuxi codsi lagu bedelayo goobta maxkamadda.

Tilmaamaha iyo tusmooyinka waxa ay ku jiraan qaybta “Tusmadda Codsiga Lagu Bedelayo Goobta” ee warqadda xogta aruursan. Iskaan garee koodka QR (QR code) si aad u hesho nuqul banaan oo xirmadda codsiga bedelida goobta maxkamadda ah ama gal barta:
[lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-07/Blank Change of Venue Packet.pdf](http://lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-07/Blank%20Change%20of%20Venue%20Packet.pdf)



Samee sedex nuql (copies) oo codsiga ah. Kala har hal nuql codsiga adigu.

Hal nuql oo codsiga ah boostadda u dhig maxkamadaadda hadda.

Waxa aad ka heli kartaa magaca iyo ciwaanka maxkamadaadda hadda adigoo ka eegaya meesha hadda balanta dacwo qaadida lagaaga qabtay. Isticmaal tilmaaha tallaabada 5.

TALLAABADA 4



TALLAABADA 5



Hal nuqul oo codsiga ah boostadda u dhig qareenka dowladda.


Kolka la qaadayo dacwadaada laanta socdaalka (immigration), waa shaqadaadda inaad cadeyso in aan lagu masaafurin. Waa shaqadda qareenka dowladda inuu cadeeyo in lagu masaafuriyo. Qareenka dowladdu waxa uu u baahan yahay inuu ogaado inaad rabto inaad bedesho goobta maxkamadaadda. Qareenka dowladdu waxa uu u shaqeeyaa Xafiiska La Taliyaha Guud ee Dhanka Sharciga (OPLA). Ciwaanka Xafiiska la yiraa OPLA waa uu ka duwan yahay ciwaanka maxkamadda. Si aad u hesho ciwaanka xafiiska OPLA si aad ugu hagaajiso codsigaaga:

- **Wac maxkamadda balanta dacwo dhagaysiga lagaaga qabtay.** U sheeg inaad isku dayeyso inaad xareysato codsi bedeli goobta maxkamada. Waydii magaca iyo ciwaanka xafiiska OPLA ee loo xil-saaray maxkamadaada.

Eeg si aad u hubiso in maxkamadaadii la bedelay.

Maxkamaddu waxa boostada kuu soo dhigi doontaa amar (warqad weyn oo dowlaadeed) oo sheegaysa in codsigaagii la ansaxiyey iyo in kale. Sidoo kale waa aad wici kartaa ama waxa aad eegi kartaa khadka (online) ka si aad u aragto inaad aad leedahay dacwo qaadir balanteed lagaaga qabtay maxkamadda laanta socdaalka (immigration) ee aad dooratay in laguu wareejiyo. Waxaa laguu sheegi doonaa taariikhda, waqtiga, iyo meesha dacwo dhagaysigaaga. Haddii maxkamadaadda la bedelay, maxkamadaada cusub waa la soo qori doonaa.

- **Telefan ahaan.** Wac khadka EOIR ee ah **1-800-898-7180**. Geli Lambarkaaga -A (A-Number) ama “Lambarka diiwaangelinta Ajnabiga.” (Gal barta immigrationhelp.org si aad u barato sidda lagu helo Lambarkaaga-A.) Isticmaal taxaalka kala doorashadda waxyabaha si aad u hubiso taariikhda iyo waqtiga dacwo qaadidaadda. Khadku waa Ingriiska iyo Isbaanish. Riix 2 si laguugu caawiyo Aka-Isbaanishka.

- 
- **Khadka (Online).** gal acis.eoir.justice.gov, Geli A-Lambarkaaga (A-Number.) Eeg “akhbaarta Dacwo Qaadida Xigta” iyo “Akhbaarta La Soo Xiriirida Maxkamadda.”

Codsi Tusmo ah oo ku saabsan Bedelka goobta Maxkamada

Maxaan la diraa codsigayga ah bedelida goobta Maxkamada?

Waxaa jira 5 waxyaabood oo aad u baahan tahay inaad la dirto codsigaaga bedelida goobta maxkamadda. Qayb walba waa **khasab** in lagu buuxsho Af-Ingiriis.

1. **Warqad kore.** Tani waxa ay maxkamadda u sheegi qofka aad tahay, inaad guurtay, meesha aad u guurtay iyo goobta maxkamada iminka aad dacwada ku leedahay.
2. **Codsiga.** Tani waxa ay maxkamadda u sheegtaa magaaladda iyo gobolka aad doonayso in dacwo dhagaysigaaga loo wareejiyo. Siddoo kale waxay tираа sababta aad u doonayso inaad wareejiso dacwo dhagaysigaaga.
3. **Amarka.** Tani waa foom ay maxkamaddu buuxin doonto ayna dib kuugu soo diri doonto. Waa sidda ay maxkamaddu kuugu sheegi doonto in codsigaagii la ansaxiyey iyo in kale.
4. **Xaashida Adeegga.** Tani waxa ay u sheegi maxkamadda goorta iyo sidda aad ugu dirtay nuql codsiga ah qareenka dowladda.
5. **Cadeyn ah Ciwaan Cusub, Haddii aad Hayso.** Tani waa nuql ah dukumiinti cadeynaya inaad ku nooshahay ciwaanka cusub. Tusaale ahaan, waxaa aad ka soo diri kartaa nuql biilka korontada, warqadaha guri kiraysiga ama dukumiinti iskuulka cusub ee ilmahaaga. Dukumiintiga waa khasab inuu leeyahay magacaaga iyo ciwaanka cusub.

Ma jiraa foom ama nuql banaan oo codsigu uu leeyahay oo aan buuxin karo?

Ka hel nuql banaan oo codsigan ah barta: lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-07/Blank Change of Venue Packet.pdf

Isticmaal tusmooyinka warqadan xogta aruursan ku jira si ay kaaga caawiyaan buuxinta, xaashida kore, codsiga, amarka iyo cadeynta adeegga. Sawir (copy) ka qaad dukumiintiga cadeynaya ciwaanka. Kuna soo dar foomamka kale.

MOTION TO CHANGE VENUE: TUSMO WARQADA KORE AH

Your Name: Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

Your Address: Ku qor ciwaankaaga halkan

**UNITED STATES DEPARTMENT OF JUSTICE
EXECUTIVE OFFICE FOR IMMIGRATION REVIEW
IMMIGRATION COURT**

City and State: Qor magaaladda iyo gobolka maxkamadaadda iminka ee laanta socdaalka

In the Matters of:

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan
(Your Name)

File No.: A Ku qor lambarkaaga-A halkan
(Your Alien Registration Number)

Ku qor macaga ilmahaaga ama xilahaaga halkan
(Name)

File No.: A Ku qor Lambarka-A ilmaha ama xilahaaga halkan
(Alien Registration Number)

Ku qor macaga ilmahaaga ama xilahaaga halkan
(Name)

File No.: A Ku qor Lambarka-A ilmahaaga ama xilahaaga halkan
(Alien Registration Number)

Immigration Judge: Ku qor magaca xaakimka

laanta socdaalka halkan Next Hearing Date:

Ku qor taariikhda dacwo qaadidaada
halkan. Haddii aadan laheyn balan
dacwo qaadid ah oo jaa laguu
qabtay, ku qor "waxba" ama "N/A."

Kaliya ku dar qaybtan haddii aad xilo ama ilmo ay
ku jiraan kiiskaaga maxkamadda laanta socdaalka.

**RESPONDENT'S MOTION TO
CHANGE VENUE**

MOTION TO CHANGE VENUE: SAMPLE MOTION

RESPONDENT'S MOTION TO CHANGE VENUE

Respondent Ku qor magacaaga oo buuxa halkan, moves this Honorable Court to change the venue of his/her removal proceedings from Qor magaaladda iyo gobolka maxkamadaadda iminka ee laanta socdaalka to the immigration court in Ku qor magaaladda iyo gobolka maxkamada u dhow ciwaankaaga cusub

Respondent seeks this change of venue pursuant to 8 CFR § 1003.20. In support of this motion, I state as follows:

- Write that you moved.
- Ask to move your case from your current immigration court to an immigration court near your new address.
- You can also say why it would be hard for you to travel back to your current immigration court for your hearing.
- Write this statement in English.

Respectfully,

Ku saxiix magacaaga halkan

(Signature)

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

(Name)

Ku qor taariikhda maanta halkan

(Dated)

MOTION TO CHANGE VENUE: SAMPLE ORDER

United States Department of Justice
Executive Office for Immigration Review
Immigration Court

Ku or magaaladda iyo gobolka maxkamadaadda iminka ee laanta socdaalka halkan

[the court's location (city or town) and state]

In the Matter of: Ku qor magacaaga oo buuxa halkan Alien Number: Ku qor lambarkaaga-A halkan

ORDER OF THE IMMIGRATION JUDGE

Upon consideration of the respondent's Motion to Change Venue, it is HEREBY ORDERED that the motion be **GRANTED** **DENIED** because:

- DHS does not oppose the motion.
- The respondent does not oppose the motion.
- A response to the motion has not been filed with the court.
- Good cause has been established for the motion.
- The court agrees with the reasons stated in the opposition to the motion.
- The motion is untimely per _____.
- Other: _____

Deadlines:

- The application(s) for relief must be filed by _____.
- The respondent must comply with DHS biometrics instructions by _____.

Date

Immigration Judge

CERTIFICATE OF SERVICE

This document was served by: Mail Personal Service Electronic Service

To: Respondent Respondent's C/O Custodial Officer Respondent's Atty/Rep DHS

Date: _____ By: Court Staff

Attachments: EOIR-33 EOIR-28 Legal Services List Other

Leave this section blank. The court will fill out this part.

MOTION TO CHANGE VENUE: SAMPLE CERTIFICATE OF SERVICE

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

(Respondent's Name)

Ku qor lambarkaaga-A halkan

(Respondent's Alien Number)

CERTIFICATE OF SERVICE

On Ku qor taariikhda maanta halkan, I, Ku qor magacaaga oo buuxa halkan,

(date)

(printed name of person signing below)

served a copy of this Motion to Change Venue,

and any attached pages to Ku qor "Xafiiska Weyn ee La Talinta Dhanka Sharciga" ee DHS – ICE halkan

(name of party served)

at the following address: Ku qor ciwaanka xafiiska OPLA halkan

(address of party served)

Qor sidda aad ugu diri doonto nuqul qareenka dowladda (Xafiiska OPLA). Tusaale by ahaan, "USOS mudnaanta leh" "(USPS priority mail.)".

(method of service, for example overnight courier, hand-delivery, first class mail)

Ku saxiix magacaaga halkan

(signature)

Ku qor taariikhda maanta halkan

(date)

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabiciidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.